Sheekadaydu waxa ay ka bilaabmaysaa sannadkaygii u horeeyay ee Jaamacadda.
Sannadkaa waxaa isoo maray mushkilado farabadan.
Waxaa kala tagay (is furay) labadaydii waalid, waxaan galay shil baabuur, sidoo kale waxaa geeriyooday mid ka mid ah saaxiibaday.

Markaasaa waxaan is weydiiyay: maxaan halkan u joogaa?! Waana maxay ujeedka noloshu?!
Waxaanan bilaabay inaan ka shekiyo ujeedka (hadafka) nolosha.
laakiin, maadaama aan Kiristan ahaa, waxaan bilaabay inaan xaiiqo raadin sameeyo.
Waxaan aaday teendhada Kaniisadda, waxaanan arkay inay dhammaantood ku heesayaan erayo aanan garanaynin.

Waxaanan waydiiyay wax ka mid ah su'aalaha i daaliyay.
Laakiin, maanay kala furin Baybalka si ay jawaabta iigu sheegaan.
Taas bedelkeed, mid kasta oo iyaga ka mid ah waxa uu i siiyay aragtidiisa shaqsiga ah.
Sidaas awgeed, jawaabuhu waxay ahaayeen kuwo is khilaafsan. Iskaba dhaafee, mararka qaar aragtiyaha qaarkood way is burinayeen.
Xitaa fikradaha ay Alle ka aaminsanaayeen waxay ahaayeen fikrado tag-daran, is burinaya, oo aan waxba qancinaynin.
Sidee loo del-deli karaa Ilaahay, oo uu waxaas oo dhiba ula kulmi karaa?!
Sidaas awgeed, waxaan ku baraarugay inay jiraan wax fara-badan oo macne-leexin ah (Ta'wiil) oo lagu sameeyay Masiixiyadda.

Waxbarashadayda jaamacadda, waxaan ku garab waday shaqo, aan ka shaqayn jiray kaalin shiidaal.
Mid ka id ah saaxiibaday ayaa waxa uu ahaa Hindi Handuusi ah.
Markaasaan waxaan waydiiyay: maxay tahay sheekhana Ilaaha Handuusiga ah ee leh madaxa maroodiga oo kale?
Suurtogal may ahayn miyaa inaad doorataan Ilaah leh madaxa libaaxa oo kale -tusaale ahaan-?!
Sidaas awgeed, umaan bogin Handuusiyadda.

Waxaanan bilaabay inaan dabagalo diimo kale.
Kolanna waxaan is weydiiyay diinta Yahuudiyadda.
Baadhitaan dheer kadibna, waxaan ogaaday in fikradda ay Alle ka haystaan ay is burinayso.
Sida ay isu burinayaan baadariyada Kiristanka oo kale.
Sidaas daraadeed, kamaan helin diinta Yahuudda wixii aan raadinayay.

Ugu danbayn, waxaan baadhitaan ku sameeyay diinta Buudiga, waxaanan maleeyay inay tahay midda aan dooran doono.
Laakiin, markii aan ku xeel-dheeraaday baadhitaanka (diina Buudiga), waxaan ogaaday inaany diinba ahayn.
Ayse tahay qaab lagu macaasho.

Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa mid ka mid ah asxaabtay waxa uu I waydiiyay diimihii aan baadhitaanka ku sameeyay.
Waxaan ku iri: waxaan baadhay Masiixiyadda, Handiisiyadda, Hayuudiyadda iyo Buudiga.
Wuxuuna igu yiri: bal ka warran Islaamka isaga?
Waxaan ku iri: maanan baarin islaamkooda.
Oo maxaa igu kellifaya diintooda?!
Laakiin, muddo kadib, waxaan is arkay anigoo gelaya masjid aniga oon bixinin kabahayga kuna dul tallabsanaya sijaayadda Salaadda.
Waxaanan ku sigtay inaan ku istaago mid ka mid aah kuwa sujuudsan.
Kaddib, waan fiiriyay, waxaanan arkay sheekhii oo dhankayga u soo socda oo dhoolla caddaynaya, wuxuuna yiri: maalin wanaagsan saaxiibkay! Sidee tahay?
Soo dhawayntan wanaagsan ee sheekha kadib, waxa uu bilaabay inuu wax I weydiiyo.
Waxaanan watay su'aalihii aan hore cid u soo weydiiyay.
Waxyaabaha aan aadka ula shaqaraarayna waxaa ka mid ah marka aan wax weydiiyo, isla markiiba maanay ii jawaabaynin.
Ee waxay soo qaadanayeen Quraanka, waxayna igu dhahayeen: akhri halkan walaal.
Halkaana waxaan ka helayay jawaabta si kasta oon su'aalo adag u weydiiyo.
Labo todobaad kadib, waxaan ku iri mid ka mid ah Muslimiinta -markaa su'aal weydiiyay kadib-: maxaad ii siin wayday aragtidaada shaqsiga ah?!
Wuxuuna igu yiri: suuragal maaha inaan aragti gaar ah yeesho marka aan ka warramayno hadalka Alle. Arrinkaasina aad ayuu ii saameeyay.

Kaddib, waxaan qaatay nuskho Quraanka ah, waxaanan bilaabay inaan akhriyo, waxaanan ogaaday inaanu arrinku la mid ahayn akhrin sheeko, iskaba dhaafe waxaan akhrinayay arrin wax i faraya ina hagaya.
Habeen ka mid ah habeenna, ayaan u fariistay inaan ka fekero addilada ka warramaysa xaqiiqooyinka, sida buuruhu inay yihiin dhidibo, ama koritaanka uur-jiifta inta uu ku jiro riximka hooyadii.
Waxaanan iri: Ilaahayoow, i hanuuni, kadibna xaalkaygii gebi ahaanba wuu is bedelay.
Waxaanan dareemay inuu Ilaahay i tusiyay (i hanuuniyay); waayo koonkan oo lala qabo quruxdiisa iyo weynaantiisa, waxaanan suurogal ahayn inuu samaysmo Abuure la'aantii.

Waxaanan go'aansaday inaan noqdo qof Muslim ah, oo aan ku dhawaaqo labada Shahaado,
Markaan ku dhawaaqay (labada shahaado) kadib, waxaa qalbigayga ka baxay dhammaan cabsidii iyo shakigii.
La macaamilkaygii wanaagsanaa ee aan kula dhaqamayay aabahay ayaa ka dhigtay inuu isna fahmo in xaqiiqada Islaamku ay ka duwan tahay beenaha laga faafiyo.
Sidaas awgeed, waxa uu iga codsaday Quraanka, waxaanan hubaa inuu dhawaan caddayn doono Islaamnimadiisa, haddii Alle idmo.